

Caymiska qiimaha jaban ee mudada dheer ah ee shaqaalaha Washington



WA Cares Fund waa dheefo la kasbado oo loogu talagalay inay kaa Caawiyaan inaad si madaxbanaan gurigaaga ugu gawoowdo. Inteena badan waxaan u baahanahay daryeel mudo dheer ah si uu nooga caawiyo howl maalmeedyada sida qabayska, cuntada, socsoshada iyo maamulashada daawada, laakiin laakiin ma haysano qaab aan iskaga bixino.

Medicare iyo caymiska caafimaadku ma daboolo daryeelka mudada dheer ah, Medicaid waxay sida caadiga ah kaaga baahantahay inaad noloshaada u kaydiso \$2,000 si aad ugu qalanto. WA Cares waxay bixisaa adeegyo muhiim ah si ay kuu siiso xulashooyin badan inta aad kujirto xiliyada naftaadu ugu nugushahay.

Qaabka ay u shaqayso

Si ootomaatig ah uga qaybqaado



Ku bixi 0.58% oo mushaarkaaga ah inta aad kujirto sannadaha aad shaqaynayso.

Xaq u yeelo dheefaha



Codso inaad hesho dheefaha haddii buuxiso shuruudaha bixinta iyo daryeelka.

Isticmaal dheefahaaga



Dooro qaabka aad u isticmaali lahayd \$36,500 cadadka dheefaha nolosha (koboca sicir bararka).

Si aad ugu qalanto dheefaha

Waa inaad buuxiso laba shuruudood si aad u hesho dheefaha.

1. Shuuudda qaaraanka

Waxaad buuxin kartaa shuruudaha qaaraanka mid kamid ah sadexda qaab.

- **Qaabka joogtada ah:** Hel cadadka dheefaha oo buuxda adigoo ku bixinaya ugu yaraan 10 sanno.*
- **Qaabka Kumeelgaarka ah:** Hel cadadka dheefta oo buuxa haddii aad ka qaybqaadato ugu yaraan saddex kamid ah lixdii sanno ee lasoo dhaafay* xiliga aad codsanayso dheefaha.
- **Qaabka kalaguurka ah:** Haddii aad dhalatay kahor 1968, hel adeega inta aad nooshahay oo dhan soconaya 10% oo ah cadadka dheefta dhamaystiran sannad walba* oo aad qaaraan bixiso.

*Waxaan tirin doonaa sannad walba oo aad shaqayso ugu yaraan 500 oo saacadood.

2. Shuruudaha baahiyaha daryeelka

Waa inaan go'aaminaa inaad u baahantahay caawimaada laba ama ka badan oo ah howlmaalmeedyada aadna usii baahan doonto caawimaad ugu yaraan 90 maalmood. Howlaha aan qiimaynayno waa:

- Qabayska
- Socsocodka sariirta
- Wareejinta (kasoo kicida iyo ku fariisiga kursiga)
- Isticmaalka suuliga
- Socsocodka (socodka ama warwareegista)
- Cuntada
- Maamulista daawooyinka

Waxaan xisaabin doonaa howlo kasta oo aad u baahato in lagu korjoogteeyo (sida la socosha, isticmaalka usha ama diyaarsiga kaalmada) si ada u dhamaystirto.

Waxaad ka guuri kartaa gobolka oo waxaad sii wadan kartaa ka qaybqaadshada si aad u hesho dheefaha markii aad daryeel u baahato.

Codsiga dheefaha

Si aad u bilowdo habraaca, adiga (ama qof ku caawinaya) waxaad samayn kartaa akoon dheefaha WA Cares adigoo booqanaya wacaresfund.wa.gov/apply.

Markii aan xaqiijino inaad buuxisay shuruudaha qaaraanka, waxaad qabsan doontaa balan toos ah si aad uga hadasho baahiyahaaga daryeelka. Kaddibna waxaan kuu sheegi doonnaa in lagu ogolaaday inaad isticmaasho dheefaha iyo in kale.

Booqo wacaresfund.wa.gov/benefits si aad wax badan uga ogaato.

Isticmaal dheefahaaga

Waxaad isticmaali kartaa dheefahaaga si aad u hesho adeegyo kasta oo caymis leh iyo taageerada ka imaanaysa bixiyaha WA Care.

Si lagaaga caawiyo joogista gurigaaga

- Daryeelka guriga lagu bixiyo ee qofku bixinayo ama wakaalada daryeelka gurigu bixinayo
- Qiimaynada badqabka guriga
- Qiimaynada badqabka guriga
- Wax ka badalista guriga
- Gaadiidka
- Qalabka iyo teknoolojiyadda la qabsiga
- Nidaamka ka jawaabista qofka
- Shaqada guriga iyo barxadda

Bulshadaada dhexdeeda

- Guriga lagu xanaaneeyo dadka waaweyn
- Adeegyada maaliintii ee dadka waaweyn la siiyo

Waxaa dhici karta in adeegyada qaarkood aan wadankoo dhan laga heli karin.

Si aad u caawiso qaybta daryeelbixiyahaaga qoyska

- Daryeelka lacagta lagu bixiyo ee ka imaanaya qof ehel ah, oo uu kamid yahay midka lamaanahaaga
- Daryeelka nasiinada ah ee gurigaaga ama goobtaada
- Waxbarashada iyo la talinta si ay kaaga caawiyaan maaraynta daryeelkaaga
- Taageerada cudurka asaasaqa iyo habdhaqanka
- Iskudubarika kalaguurka daryeelka si lagu taageero markii aad ka baxayso goobta ama isbitaalka

Goobta dhexdeeda

- Adeegyada nolosha ee laga caawiyo, oo ay kujiraan adeegyada daryeelka xasuusta
- Xaruumaha baxnaanada

Hel taageero

Waxaad nala soo xiriiri kartaa Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo (waa xirarahay maalmaha fasaxyada gobolka). Si aad u hesho akhbaartii ugu danbaysay booqo wacaresfund.wa.gov.



Telefoonka

844-CARE4WA (844-227-3492)



Iimayl ama wadasheekaysi

Booqo wacaresfund.wa.gov/contact

TTY/ TDD ama Washington Relay Service, garaac 711. Caawimaada luuqada ayaad ku heli kartaa telefoonka ama iimaylka.